

# #rumours about germany

Dhabta loobaahan yahay  
in Qaxootiga loo sheego



Federal Foreign Office

**Hadalo  
Kutirikuteen ah,  
ee Dad badan  
Jarmalka kaaga  
sheegaan ha  
rumaysan, Anaga  
ayaa Dhabta  
ama Runta kuu  
hayna**

[more >>](#)

# Dhabta loobaahan yahay in Qaxootiga loo sheego

Waxaa jirta in Website oo Cusub la furay, Kaas oo lagu qoray Warbixino lagu kalsoonaan karo Kuwaasoo kuu sheegaya Dhabta Yurub iyo Jarmalka ka jirta: [www.rumoursaboutgermany.info](http://www.rumoursaboutgermany.info)

Ma waxaad ku talo jirtaa in aad Yurub aadid? Mise waabad soo dhaqaaqday, oo Jidka ayaad ku soo jirtaa? Mise Jarmalka ayaadba ku sugan tahay, oo waxaa laguugu dhahay Waddankaaga ku noqo? Markaa waxaa laga yaabaa in aad Su'aalo badan qabtid. Waxaa laga yaabaa in aad Hadalo badan oo aan Waxba ka jirin maqashay.


Tusaale ahaan: Waxaa lagu sheegay in aad Soomaali tahay oo Jarmalka Dadka Soomaali ka imaada Sharciga horay bay ugu soo tuuraan? Mise waxaa lagu sheegay in Dowladda Jarmalka ay Shaqo iyo Lacag laguugu soo dhawaynaayo ku siinayso? Mise waxaa laguugu dhahay haddaa Waddankaaga si xurnimo ah ugu laabatid Lacag baa lagu siinayaa?

Aad bay u adag tahay in Mar Walba Jawaabta Saxda ah lagu siiyo. Hadalo kutirikuteen oo aad u faro badan baa Meelahaas lagu sheegaa. Facebook- iyo WhatsAppka Hadaladaas oo kale waa ay ka buuxaan. Dadka Tahriibka ku shaqaysta waa Beenaaleyaal, oo Hadalo Qalad ah bay faafiyaan, waayo Lacagtaada oo kaliya bay rabaan, Nafsaddaada waxba kama galin. **Markaa Mukhalas Tahriib ku shaqaysta weligaaga ha aaminin!**



Halkaan baad keheli kartaa Warbixinta Saxda ah ee aad u baahan tahay: Jarmalka baa Webseitkaan kuu diyaarshay ee si fiican u akhriso [www.rumoursaboutgermany.info](http://www.rumoursaboutgermany.info). Cinwaankaas Internetka baa Wax Walba oo Sax ah ka akhrisan kartaa, oo kaa caawin kara sidaa Go'aan Sax ah u gaari lahayd. Warbixinada Webkaas ku qoran oo dhan waxaa soo diyaarshay Dad Qaxa

Khabiir ku ah. Websitka waxaa uu ku qoran yahay Afafka Ingriisiga, Faransiiska iyo Carabiga, Telefoonkana waa loogu talo galay. Warbixino iyo Wax Kasta oo soo kordha iyo Wixii kale ee Dadka Qaxootiga sheegaan baa Webka lagu qoraa, si markaa aad ula socotid wixii Cusub, sida haddii uu Sharci Cusub soo baxay iyo Warar Been ahna Webka waa lagu qoraa si lagaaga digo Beenta. Qaxootiga waxaa uu u baahan yahay in Runta loo sheego, ee Been uma baahna #RumoursAboutGermany.



Federal Foreign Office

[www.rumoursaboutgermany.info](http://www.rumoursaboutgermany.info)

Photos: ©dpa and shutterstock